Boggan wuxuu bixiyaa jawaabaha qaar ka mid ah su'aalaha ugu caansan ee ku saabsan isbeddelada soo socda ee sharciga ku saabsan ku deeqidda xubinta gudaha Ingiriiska.

Maxaa isbeddelaya?

Sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta wuu isbeddelayaa gudaha Ingiriiska. Tan macnaheedu waa in laga bilaabo gu'ga 2020, dhammaan dadka waaweyn ee jooga Ingiriiska waxaa loo qaddarin doonaa inay yihiin tabarucayaal xubin marka ay dhintaan haddii aysan qorin go'aan ah inaysan ku deeqin ama aysan ku jirin mid ka mid ah kooxaha laga reebay.

Tani waxaa badanaa loo yaqaan nidaamka 'ka baxida'.

Waxaad ku qori kartaa go'aankaaga ku jirida ama ka bixida Diiwaanka Ku Deeqaha Xubinta.

Kuwa laga reebay waxay noqon doonaan:

- dadka ka yar 18 jir
- dadka ku noolaa gudaha Ingiriiska wax ka yar 12 bilood ama aanan halkan ugu nooleyn si iskood ah
- dadka aan awooda u lahayn inay fahmaan isbeddelka.

Dadka waaweyn ee uu saameynayo isbeddelka wali waxay haystaan ikhtiyaar ah inay doonayaan inay noqdaan tabaruce xubin iyo xubnaha ay jeclaan lahaayeen inay ku deeqaan, qoysaskooduna wali way ku lug lahaanayaan ka hor ku dhaqaaqida ku deeqida xubinta.

Waa kuwee kooxaha laga reebay isbeddelkan?

- Kuwa ka yar 18 jirka
- Dadka aan laheyn awood maskaxeed ay ku fahmaan qorshayaasha cusub iyo qaadida tallaabada lagama maarmaanka ah
- Dadka martida ku ah gudaha Ingiriiska, iyo kuwa aanan halkan ugu nooleyn si iskood ah
- Dadka ku noolaa gudaha Ingiriiska wax ka yar 12 bilood ka hor dhimashadooda

Maxaan ugu baahan nahay nidaam ka bixid?

Waxaa jiray horumar la taaban karo oo laga gaaray ku deeqida xubinta balse wali waxaa jira inay yar yihiin tabarucayaasha. Sannad kasta, boqolaal dad ah ayaa ku dhinta gudaha Boqortooyada Ingiriiska iyagoo ku jira liistada sugitaanka ku tallaalidda xubnaha.

Si aan u sii wadno hormarkayaga, waxaan rabnaa inuu isbeddel ku yimaado aragtiyada dadweynaha. In ka badan 6 ka mid ah 10-kii qoysba ayaa oggolaaday ku deeqida xubinta balse si loo haqabtiro baahiyaha bukaanada waxaan u baahanahay ugu yaraan 8 ka mid ah 10-kii qoysba inay taageeraan ku deeqida oo ay oggolaadaan inay badbaadiyaan iyo wanaajiyaan nolosha.

Caddaynta ugu dambaysa ee Wales waxay muujineysaa in heerarka oggolaanshaha ay si weyn kor ugu kaceen tan iyo markii ay soo saareen nidaamka ka bixida sanadkii 2015. Waxaan isha ku heynaa horumar la mid ah gudaha Ingiriiska.

Goorma ayuu bilaaban doonaa nidaamka ka bixida?

‘Nidaamka ka bixida’ wuxuu dhaqangalayaa gu'ga 2020. Taariikhda saxda ah ee ay dhici doonto in nidaamka cusub la dhaqangeliyo wali ma aysan xaqiijin Dowladda.

Sharciga lagu beddelayo sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta gudaha Ingiriiska wuxuu ka maray nidaamka baarlamaaniga ah wuxuuna helay Oggolaansho Boqortooyo.

Isbeddellada looma dhaqangalayo si dhaqso ah si loo hubiyo in waqti badan la helo si dadka loogu wargaliyo waxa isbeddelaya. Tani waxay siin doontaa dadka waqti ay ku doortaan haddii ay rabaan inay noqdaan tabaruce xubin iyo in ay go'aankan la wadaagaan qoyskooda iyo asxaabtooda.

Miyaad si toos ah u qaadan doontaan xubnahayga haddii aanan ka bixin?

Maya. Ku deeqida xubinta waxay kaliya dhici kartaa xaalado yar qaarkood. Qiyaastii 500,000 oo qof ayaa ku dhinta sanad kasta Boqortooyada Ingiriiska, laakiin keliya 1 ka mid ah 100-kii qof ayaa u dhinta duruufo ay awoodi karaan inay tabarucaan xubnahooda. Xubnaha ayaa kaliya la tallaali karaa isla marka ka dib markuu qofka dhinto waana in la isticmaali karo, marka tabarucyeyaashu badanaa waxay noqon karaan oo keliya dadka ku dhintay qaybta daryeelka degdegga ah ee isbitaalka ama shilalka iyo waaxda gurmadka. Caqabadahaas dartood, ku deeqe kasta oo suurtagal ah waa qaali.

Qoyskaaga waa lala xiriiri doonaa ka hor inta aysan ku deeqida dhicin. Su'aalo kasta oo qoyskaaga laga yaabo inay ka qabaan hannaanka ku deeqida xubinta ayaa laga hadli doonaa, oo ay ku jiraan sida iimaankaaga, waxa aad aaminsanaantahay ama dhaqankaaga waa la ixtiraami doonaa. Waxaa runtii muhiim ah in aad doorato inaad rabto in aad noqoto ku deeqe iyo in kale iyo inay qoyskaaga ogaadaan. Kala hadal go'aankaaga qoyskaaga si ay gacan uga geysan karaan hubinta xulashadaadaada in la sharfo.

Miyaan luminayaa kantaroolka waxa ku dhacaya jirkayga?

Maya, waxay wali noqon doontaa inaad xulato haddii aad rabto inaad noqoto ku deeqe xubin. Oo haddii aadan rabin inaad ku deeqdo, waxa run ahaantii degdeg ah oo fudud inaad ku qorto go'aankaaga Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS. Qaabka ugu dhakhsaha badan uguna fudud tani loo sameeyo waa onlaynka. Haddii aadan heli karin internet, waxaad sidoo kale ka wici kartaa xaruntayada 0300 123 23 23.

Waxaad dib uga cusbooneysiin kartaa doorbidaadaada Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS si dhakhso ah oo fudud waqti kasta. Ma qaadan doono xubnaha dadka oggolaansho la'aan.

Qoyskaaga waa lala tashan doonaa mar walba ka hor ku deeqida inta aysan dhicin. Su'aalo kasta oo qoyskaaga laga yaabo inay ka qabaan hannaanka ku deeqida xubinta ayaa laga hadli doonaa, oo ay ku jiraan sida iimaankaaga, waxa aad aaminsanaantahay ama dhaqankaaga waa la ixtiraami doonaa. Waxaa muhiim ah in qoyskaaga iyo asxaabtaada ay ogaadaan xulashadaada. Tani waxay sahlaysaa iyagu inay sharfaan xulashadaada, waxkastoo xulashadaasi tahay.

Miyaad wali weydiisan doontaa oggolaansho qoyskeyga?

Haa. Qoysaska waa la sii wadi doonaa in lagala tashado ku deeqida xubinta. Waxaa jira dhowr sababood oo tanI loo nisbeynayo:

- Iyadoo tixgelin la siinayo qoyska ay soo food saartay dhimashada qof u dhow;
- Qoysku waxaa laga yaabaa inuu hayo macluumaad muhiim ah oo ku saabsan go'aanka qofka ee ku xeeran ku deeqida taasoo ka sii dambeysay go'aan kasta oo la qoray Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS;
- Taageerada qoyska waxay naga caawisaa hubinta macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan ehelkooda, sida caafimaadkooda, safarkooda iyo taariikhdooda bulsheed inay heli karaan kalkaaliyayaashayada ku takhasusay ku deeqida xubinta. Macluumaadka ay qoysasku bixiyaan ka hor ku dhaqaaqida ku deeqida xubinta, iyo sidoo kale qoraalada caafimaadka iyo baaritaannada kale, waxay muhiim u yihiin fahamka in xubnaha qofka ay amaan yihiin in lagu tallaalo qof kale.

Qoyskaaga had iyo jeer waa lala xiriiri doonaa haddii ku deeqida xubinta ama nudaha ay suurtagal tahay. Haddii aad horay u gaartay go'aan ku saabsan ku deeqida oo aad la wadaagtay arrintan qoyskaaga, waxaa laga filayaa inay taageeraan go'aankaaga, wax kasto uu yahay.

Haddii aadan qorin go'aan isla markaana aadan ku jirin koox laga reebay, qoyskaaga ayaa lala soo xiriiri doonaa oo la weydiin doonaa inay hayaan wax macluumaad ah oo ku saabsan go'aankaaga kudeeqida xubinta. Haddii aan macluumaad la heli karin, waxaa loo qaddarin doonaa inaad oggolaatay inaad ku deeqdo xubnahaaga waxaana qoyskaaga laga fili doonaa inay taageerayaan arrintan.

Dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano iyo kuwa lahayn awood maskaxeed waa laga reebay sharciga cusub, laakiin wali waa laga yaabaa inay go'aan ku qoraan Diwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS. Macluumaadkaan way heli doonaan qoyska waqtiga wadahadalka. Go'aanka ugu dambeeya ee ku deeqida xubinta ee laga helo dadka ku jira kooxaha laga reebay waxaa gaara qoyska, balse waxaa lagu dhiirigelin doonaa kalkaalisada takhasuska leh inay tixgeliso go'aan kasta oo qoran.

Miyay isbeddeladan saameeynayaan carruurtayda?

Nidaamka ka bixida ma quseeyo carruurta da'doodu ka yar ahay 18 sano. Marka ay jiraan xaalado ah in go'aan ku deeqid looga baahan yahay qof ka yar 18 sano, qoyska waxaa la weydiisan doonaa inay go'aankaas gaaraan oo ay bixiyaan oggolaansho.

Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta wuu u furan yahay qof kasta, iyadoo aan loo eegin da'da. Haddii ilmuhu doonayo inuu qoro go'aan, ama waalidka ilmuhu doonayo inuu taasi u sameeyo, fursadani waa la heli karaa. Macluumaadka lagu qoray Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS waxaa heli kara kalkaaliyayaashayada ku takhasusay ku deeqida xubinta kuwaasoo qoyska kala xiriiro suurtagalnimada ku deeqida xubinta.

Miyay qorshahayga aaska saameyn ku yeelan doontaa?

Kalkaaliyeyaashayada ku takhasuska leh waxay mar walba la hadlaan qoyska si ay u ogaadaan inay jiraan tixgelino ku hareeraysan iimaanka, aaminsanaanta, ama dhaqanka qofka marka la eego qorshayaasha aaska. Tusaale ahaan, aas degdeg ah ama nasash furan.

Qalliinka la sameeyo si loo soo saaro xubnaha ku deeqaha waxaa fuliyo xirfadlayaal tayo sare leh, iyagoo siinaya daryeel, feejignaan iyo xushmad la mid ah sida marka ay ku jiraan qalliin kasta oo lagu badbaadinayo nolosha bukaanka. Goobaha qalliinka si taxaddar leh ayaa loo fashadeeyaa ka dib qalliinka oo wixii dhamaadka daryeelka nolosha ah ee la xiriira dhaqidda iyo karfan u xirida jirka waa la ixtiraamaa.

Ku deeqayaal badan ayaa doorbida inay sameystaan aas naxash furan ah.

Maxaa dhacaya haddii aanan waxba sameyn?

Mar haddii nidaamka cusub ka dhaqan galo gudaha Ingiriiska, haddii aadan muujin go'aankaaga ah inaad ka baxdo ku deeqida oo aadan ku jirin koox laga reebay, waxaa loo qaddarin doonaa inaad oggolaatay inaad ku bixiso xubnahaaga. Marka xitaa haddii aadan qorin inaad rabto inaad noqoto ku deeqe xubin, waxaa muhiim ah inaad ogeysiiso qoyskaaga waxa aad rabto.

Haddii aad hayso tilmaamo gaar ah oo ku saabsan unugyada aad jeclaan lahayd ama aadan jeclaan lahayn inaad ku deeqdo, waa inaad bixisaa macluumaadkan marka aad ku qorto ku deeqidaada gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS.

Haddii aad u dhimato duruufo kuwaasoo ku deeqida ay suurtagal tahay, qoyskaaga ayaa mar walba la weydiin doonaa haddii qayb ama dhammaan xubnahaaga ay tahay inaad ku deeqdo. Xubnahaaga laguma deeqi doono oggolaanshahooda la'aantiisa.

Haddii aad mar hore ku qortay go'aan aad ku deeqeysid xubnahaaga gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS, oo aadan weli u sheegin qoyskaaga, fadlan ha oggaadaan.

Haddii aad ku qortay go'aan ka bixid ah gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS, markaa waa inaad hubiso inay qoyskaaga ogyihiin waxa aad go'aansatay.

Haddii aad rabto inaad cusboonaysiiso ama dib-u-xaqiijiso go'aankaaga, waad buuxin kartaa foomka Dib-u-xaqiiji qabaarkaaga ama wici kartaa 0300 123 23 23.

Ma beddeli karaa fikirkayga?

Haa. Haddii aad ku qortay go'aan ku deeqid xubin gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS oo aad rabto inaad cusboonaysiiso ama wax-ka-beddesho ama dib-u-xaqiijiso go'aankaaga, waad buuxin kartaa foomka Dib-u-xaqiiji qabaarkaaga ama wici kartaa 0300 123 23 23.

Waa muhiim inaad la wadaagto go'aanka aad ku noqoneyso ku deeqe xubin qoyskaaga. Tani waxay siin doontaa kalsooni dheeraad ah ay ku ogaanayaan inaad dooneyso inaad ku deeqdo oo mid sahlan ka dhigaya inay ixtiraamaan go'aankaaga.

Waa maxay Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS?

Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS waa keyd xogeed haya qabaarka dhammaan dadka qoray go'aan ku saabsan ku deeqida xubinta, haddii ay go'aansadeen inay ku deeqaan iyo haddii kalaba. Ku qorida gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS iyo u sheegida qoyskaaga waa hababka ugu fiican si loo hubiyo go'aankaaga in la ixtiraamo marka aad dhimato.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad qof kala hadasho wax ku saabsan isbeddelada sharciga, fadlan wac khadkayaga heeganka ah: **0300 303 2094. Fadlan la soco in adeeggan lagu heli karo oo keliya af Ingiriisi.**